hMPXV: Su’aalaha inta badan la lsweydiiyo

Macluumaadka ku saabsan fayraska

S: Waa maxay hMPXV?

HMPXV, ama furuqa daanyeerka, waa soo gaabinta loogu talagalay furuqa daanyeerka ee ku dhaca bini’aadamka. Furuqa daanyeerka (hMPXV) waa fayras hiddo-side (DNA) oo la xiriira busbuska. Wuxuu ku dhacaa xayawaanka waana cudur goobeed (oo macnaheedu yahay inuu si joogto ah balse caadi ahaan ku xaddidan yahay gobol gaar ah) ilaa aaggaga kaynta ah ee Bartamaha iyo Galbeedka Afrika. Ma cadda xayawaanku galshaha u ah furuqa daanyeerka (hMPXV), balse jiirarka/dooliyada ayaa ah tuhmaneyaasha ugu weyn. Fayraska ayaa sidoo kale ku dhici kara jiirarka/dooliyada, Dabagaalaha, eey duureedka, iyo daayeerrada qaarkood, iyo xayawaanada kale.
Kiiskii ugu horreeyay ee aadanaha ku dhaca ayaa la aqoonsaday 1970-kii. Waxaa jira laba nooc oo hMPXVah: MPXV-1 caadi ahaan aad ayuu u daran yahay wuxuuna leeyahay heer dhimasho oo gaaraya ilaa 10%. MPXV-2 wuxuu sababaa jirro fudud. Qiyaasta heerka dhimashada kiisaska ee goobaha dalalka uu ka jiro ayaa ah qiyaastii 1%. Cudurka dillaacay 2022 ee ku lugta leh goobaha dalalka uusan cudurku horay uga jirin waxaa sababay MPXV-2.

S: Miyuu la mid yahay busbuska?

Waa isku koox fayrasyo ah, balse kani ma ahan busbus. Furuqa daanyeerka (hMPXV) aad ayay u adag tahay in la ogaado, mana ahan mid aad u daran sida busbuska. Waxaa jira laba nooc oo fayraskan ah, kan ugu weyn ee hadda socda wuxuu keenaa cudur fudud. Dadka intooda badan ayaa kaga soo kabanaya gudaha guriga iyagoo aan helin daawayn gaar ah.

S: Ma ka jiraan wax kiisas ah gudaha Oregon?

Haa. Si aad u hesho wargelinnada tirada kiisaska ka jira Oregon, booqo www.oregon.gov/oha/ph/monkeypox

S: Yuu ku dhici karaa furuqa daanyeerka (hMPXV)?

Qof kasta ayuu ku dhici karaa furuqa daanyeerka (hMPXV). Gudaha Oregon, xogteena ayaa muujinaysa in ragga iyo dadka jinsi-laaweyaasha ah uu si weyn u saameeyay furuqa daayeerka (hMPXV). Iyadoo intooda badan isku u aqoonsadaan inay yihiin khaniis ama jinsi-doorshe oo ay sheegaan inay xiriir dhow la sameeyeen dad marka ay dhasheen lab ahaa, mararka qaarkood waxay isku aqoonsan yihiin inay yihiin jinsi caadi ah iyo/ama inay xidhiidh dhow la yeesheen dadka dheddigga ahaa markaay dhasheen. Iyadoo lagu salaynayo xogtan, OHA waxay mudnaan siinaysaa xoojinta bulshooyinka jinsi-doorshaha ah si ay u helaan macluumaad, baaritaano, kahortaa, iyo xeelado daawayn si ay caafimaadqab u ahaadaan. Tiro yar oo haween iyo carruur ah ayuu sidoo kale saameeyay furuqa daayeerka (hMPXV) ee cudurka dillaacay hadda.

S: Maxaa loogu yeeraa furuqa daanyeerka?

Magaca ayaa loo bixiyay maadaama markii ugu horreysay ee la ogaaday uu ku dhacay daanyeero ku jira shaybaar ku yaala Denmarka gudaha 1958kii. Si kastaba ha ahaatee, magaca “monkeypox” sida lala xiriirinayo cudurka hadda dillaacay iyo kii ugu dambeeyay ayaa ah marin habaabin taasoo ay martigeliyeyaasha dabiiciga ah ay u badan tahay inay yihiin jiirarka/dooliyada, ma ahan xayawaanka aan bini’aadamka ahayn. Iyadoo la raacayo bayaan ay soo saareen Ururka Caafimaadka Adduunka (WHO) iyo UNAIDS, iyo si loo yareeyo fongorta la xiriirta magaca fayraska, OHA waxay adeegsanaysaa hMPXV iyo furuqa daanyeerka labaduba inay ugu yeerto fayraskan iyo cudurka uu keeno.

S: Sidee ayuu ku faafaa?

Furuqa daanyeerka (hMPXV) waxaa la isugu gudbiyaa qof-ka-qof inta badan taabashada tooska ah ee firiirica, qolfaha, ama dheecaanada jirka ee qofka qaba furuqa daanyeerka (hMPXV).

Inta badan, furuqa daanyeerka (hMPXV) ayaa sidoo kale ku faafi kara taabashada walxaha, maryaha, iyo sagxadaha uu isticmaalay qofka qaba furuqa daanyeerka (hMPXV) iyo marka la taabto dheecaannada neefmareenka, sida candhuufta, ee qofka qaba furuqa daanyeerka. hMPXV).

S: Furuqa daanyeerka (hMPXV) ma ku faafi karaa hawada?

Kala qaadida ugu badan ee cudurka hadda dillaacay ayaa u muuqata mid ka timid taabasho maqaar-ka-maqaar, muddada dheer. Macluumaad dheeraad ah ayaa loo baahan yahay si loo go'aamiyo inta jeer ee furuqa daanyeerka

ku faafi kara dheecaannada neefsashada. Qof jirran oo ku qufaca ama hindhiso qof kale ayay suurtogal tahay inuu faafiyo cudurka, inkastoo tani aan loo aqoonsan inay tahay sida cudurka hadda la isugu gudbiyo. Kala qaadida ugu badan ee cudurka hadda dillaacay ayaa u muuqata inay ka timid taabashada tooska ah ee maqaar-ka-maqaarka ah ee firiirica ama dheecaannada jireed ee qofka qaba furuqa daanyeerka (hMPXV).

S: Waa maxay astaamaha?

Jirrada ayaa caadi ahaan ku bilaabata qandho, qarqaryo, dareemida xannuun, iyo qanjirada oo barara. Isla mar ahaantaana ama shan maalmood gudahooda, firiiric ayaa soo baxa. Dadka qaarkood, astaamaha ugu horreya waxay noqon karaan firiiric yaryar. Firiirica ayaa ka soo bilaaban kara xubnaha taranka, gudaha iyo/ama hareeraha dabada, ama gudaha afka. Wuxuu sidoo kale saamayn karaa maqaarka wejiga, gacmaha, lugaha, iyo jirka.
Ugu horreyn, firiirica ayaa u ekaan kara fin ku yaala aag ka hooseeya maqaarka oo cas. Laga bilaabo markaas, finanka ayaa sii weynaan kara, buusbuus yeelan kara, oo ka buuxami kara
dheecaan ama malax. Caadi ahaan, way qolofeystaan. Caadiyan waxay qaadataa laba ilaa afar toddobaad in laga bogsado oo la yeesho maqaar cusub.

S: Muddo intee le’eg kadib markii aad u baylahday ayey astaamuhu bilowdaan?

Sida caadiga ah toddoba ilaa 14 maalmood gudahooda, inta u dhaxaysa shan ilaa 21 maalmood.

S: Goorma ayuu qofka qaba furuqa daanyeerka (hMPXV) u gudbin karaa dadka kale?

Dadka qaba furuqa daanyeerka (hMPXV) waxay gudbin karaan caabuqa laga bilaabo marka astaamuhu bilawdaan ilaa ay firiiricyadu ka bogsadaan. U gudbinta cudurka dadka kale ayaa caadi ahaan u baahan taabashada maqaar-ka-maqaarka ah. Dadka khatarta sii kordheysa ugu jira waxaa ka mid ah lammaanaha qof qaba furuqa daanyeerka (hMPXV), ama xubnaha qoyska iyo shaqaalaha daryeelka caafimaadka ee daryeelaya qof qaba furuqa daanyeerka (hMPXV).

S: Fayrasku ma faafi karaa kahor inta uusan qofku ogaan inuu jirran yahay?

Ma jiraan warbixino sheegaya in furuqa daanyeerka (hMPXV) faafo kahor inta aysan astaamuhu bilaaban. Si kastaba ha ahaatee, dadka qaarkood ee qaba furuqa daanyeerka (hMPXV) ayaa laga yaabaa inay aad u ugu jirradaan. Waxaa laga yaabaa inay astaamahooda ku khaldaan cudur kale (sida COVID-19) ama aysan arkin firiracooda.

S: Furuqa daanyeerka (hMPXV) ma cudur galmada lagu kala qaadaa?

Furuqa daanyeerka (hMPXV) ma ahan cudur galmada la isugu gudbiyo. Fayrasku wuxuu ku faafaa taabashada tooska ah ee maqaar-ka-maqaarka ee nabarrada, qolofaha, ama dheecannada jireed ee firiirica qofka qaba cudurka furuqa daanyeerka (hMPXV). Taabashada noocan oo kale ah ayaa dhici karta xilliga shumiska, hab isa siinta, koolkoolinta, iyo duugista iyo sidoo kale xilliga galmada.

S: Maxaa loo tixgaliyaa in loogu baylah noqdo furuqa daanyeerka (hMPXV)?

Qofka ayaa loo tixgalinayaa inay suurtogal tahay inuu u baylah noqday cudurka hadduu, inta lagu jiro muddada qofka qaba furuqa daanyeerka (hMPXV) uu buko oo uu weli qabo firiiric, mid ka mid ah waxyaabahaan soo socda ay dhacaan:

- Taabtay firiiric ama dheecaannada jireed ee qofka qaba furuqa daanyeerka (hMPXV)
- Galmo afka, dabada, ama siilka ah la sameeyay qof qaba furuqa daanyeerka (hMPXV)
- Taabatay dharka, gogol, dhaymo wasakhaysan, ama dhar kale ama alaabta gaarka ah, oo ay ku jiraan agabka galmada iyo qalabka galmada, ee uu isticmaalo qof qaba furuqa daanyeerka (hMPXV)
- Wayaabaha ka dhasha is-taabashada gacmaha iyo qaybaha kale ee dharka ee shakhsiga iyo nabarrada maqaarka ee bukaanka ama dheecaannada jireed, ama maryaha wasakhaysan ama dhaymo (tus., gedinta, u qubeynta, ama ka caawinta siibista) markaad xiran tahay gacmo-gashiyo balse aadan xirnayn jaakad isku-deys ah.
- Sida kale 6 cag ugu yaraan u jiray 3 saac qof aan xirnayn maaskaro oo qaba furuqa daanyeerka (hMPXV) isagoo aan qabin maaskarada qalliinka

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan u-baylah noqoshada furuqa daanyeerka (hMPXV) aadna u ogaato astaamaha ay tahay in lala socdo haddii aad u malayso inaad u-baylah noqotay cudurka, tixraac hagista ku saabsan korjoogteynta iyo qiimeynta halistaee CDC.

S: Ka warran haddii aan u maleeyo inaan qabo furuqa daanyeerka (hMPXV)?

Wac bixiyaha daryeelka caafimaadkaaga si aad ula socodsiiso kahor inta aadan aadan si uu kuu arko. Haddii aadan lahayn bixiye daryeel caafimaad, wac 2-1-1 oo qof ayaa kaa caawin kara inaad hesho rug caafimaad ama bixiye daryeel caafimaad. Waxaad sidoo kale la xiriiri kartaa maamulka caafimaadka dadweynaha ee deegaanka , kaasoo aad ku booqan karto mid ka mid ah rugaha caafimaadka.

Haddii aad qorshaynayso inaad tagto qolka gurmadka degdegga ah ama daryeelka degdegga ah, u sheeg shaqaalaha hubiyo imaanshaha inaad ka walaacsan tahay inaad qabto furuqa daanyeerka (hMPXV). Waxay ku weydiin doonaan inaad xirato maaskaro waxayna kaa caawin doonaan inaad daboosho firiirica laga yaabo inaysan ku daboolin dharka aad qabto inta aad sugeyso in lagu arko.

Tallaalka iyo xeeladaha kale ee kahortagga

S: Ma laga heli karaa tallaalka furuqa daayeerka (hMPXV) gudaha Oregon?

Haa, Oregon waa laga heli karaa tallaalka furuqa daanyeerka (hMPXV). Waxaa lagu magacaabaa Jynneos.

S: Sidee ayuu gobolka Oregou adegsanayaa tallaalka furuqa daanyeerka (hMPXV)?

Waxaa loo bixiyaa sida ugu dhaqsaha badan ee suurtogalka ah ka dib u-baylah noqoshada cudurka iyo kahor soo bixitaanka firiirica, tallaalka ayaa loo isticmaali karaa in looga hortago cudurka furuqa daanyeerka (hMPXV), in la dhimo muddada astaamuhu qaataan, ama in laga dhigo kuwo aan sidaas u daranayn.

Gobolka Oregon ayaa isticmaalayaa laba hab oo loo wajahayo tallaalka furuqa daanyeerka (hMPXV), oo ay ku jiraan:

1. Tallaalida dadka u dhowaaday qof qaba furuqa daanyeerka (hMPXV) oo ku sugan Oregon ama goob kale gudaha 14 maalmood ee ugu horreeya.
2. Tallaalka dadka ay u badan tahay inay u dhowaadeen qof qaba furuqa daanyeerka (hMPXV) gudaha 14 maalmood ee ugu horreeya.

Intaas waxaa dheer, gobolka Oregon ayaa isticmaali doona xeelad mudnaan siinaysa garoojooyinka koowaad si loo siiyo tallaalka dad badan intii suurtagal ah marka saadka tallaalku xaddidan yahay.

S: Sidee loo qaataa tallaalka?

TallaalkaJynneos ee furuqa daayeerka (hMPXV) ayaa dhowaan la ansixiyay si maqaarka ay uga qaataan dadka waaweyn Si kastaba ha ahaatee, bixita tallaalka laga qaato ayaa keliya loo ansixiyay dadka waaweyn ee jira 18 sanno ama wixii ka weyn. Carruurta ama dadka qaangaarka ah ee leh taariikhda dhaawaca hilibka yeesha (oo ah nudo nabarro ah oo hilib yeesha), waxay heli karaan isla tallaalka furuqa daayeerka (hMPXV) oo laga qaato maqaarka hoostiisa.

S: Maxaan filan karaa marka laga hadlo waxdhimaalada?

Dad badan ayaa la kulma xannuun, guduudasho, barar, cuncun, iyo/ama buro adag oo ku dhalata goobta la iska duro. Mararka qaarkood waxdhimaaladaan isla markiiba ma bilawdaan, balse qiyaastii 3-5 maalmood kadib tallaalka. Falcelinadaan waxay sidoo kale socon karaan dhowr maalmood. Dad aad u yar ayaa laga yaabaa inay dareemaan murqo-xanuun, madax-xanuun, daal, lallabbo, iyo qarqaryo dhowr maalmood kadib tallaalka (balse uma xuma sida tallaallada COVID-19!). Haddii aad ka welwelsan tahay waxdhimaalada aad dareemeyso, wac bixiyaha daryeelka caafimaadkaaga ama waaxda caafimaadka deegaankaaga.

S: Goorma ayuu tallaalka bilaabi doonaa inuu iga difaaco furuqa daanyeerka (hMPXV)?

Garoojada ugu horreysa ayaa bilowda kahortaga furuqa daanyeerka (hMPXV). Dadka intooda badan wuxuu jirkoodu ameeya jeermis-la-derisyo ka dhan ah furuqa daanyeerka (hMPXV) 2-4 toddobaad kadib tallaalka koowaad, balse kahortagga ayaa bilawda 2 toddobaad kadib garoojada labaad. Waxaan ku talinaynaa in qof kasta qaato garoojada labaad.

S: Goorma ayaan heli doonaa garoojada labaad?

Hadda, waxaanu hubinaynaa in tirada ugu badan ee suurtogalka ah ay heli karaan tallaalkooda ugu horreeya. Dadka intooda badan waxay heli doonaan garoojada labaad 3 bilood kadib mida koowaad. Dadka qaarkood ayaa laga yaabaa in jirkoodu uusan si fiican uga falcelin tallaalka ama laga yaabo inay halis ugu jiraan furuqa daanyeerka (hMPXV) ee aadka u daran waxay heli doonaan garoojadooda 4 toddobaad gudahooda. Kooxda tallaalkaaga ayaa kula soo xiriiri doonta si aad loo qabto ballanta garoojada labaad goorta ay kugu habboon tahay.

S: Ma tahay in la i tallaalo hadduu horay iigu dhacay furuqa daanyeerka (hMPXV)?

Dadka qaba furuuqa daayeerka (hMPXV) waxaa laga yaabaa inay muddo gaaban jirkoodu kahortaggo furuq daanyeer (hMPXV)oo kale. Ma garanayno ilaa inta ay le'eg tahay muddada kahortagga. Waqto xaadirkan, ma siinayno tallaal dadka uu ku dhacay furuqa daanyeerka (hMPXV) balse waxaa laga yaabaa inaan sidaasi mustaqbalka sameyno.

S: Ka waran haddii aan ka tallaalnaa furuqa daanyeerka?

Waxaan bixineynaa tallaalka iyadoon la eegin tallaalkii hore ee busbuska maadaama kahortagga uu bixiyo tallaalka busbuska is-dhimi karo waqti kadib.

S: Ma la iga rabaa inaan lacag bixiyo si aan u helo tallaalka?

Tallaalka laftiisu waa lacag la'aan, bixintiisuna waxa daboola caymis. Intaas waxaa dheer, lagaama codsan doono inaad bixiso wax macluumaad ah ama dukumeentiga xaaladad socdaalka ah.

Haddii aadan hadda u-qalmin tallaalka ama aad sugayso garoojadaada labaad, halkan waxaa ku jira waxyaabo aad samayn karto si aad naftaada iyo bulshadaada uga ilaaliso hMPXV:

Aqoontu waa awood

La soco xaqiiqooyinka ku saabsan furuqa daanyeerka (hMPXV) ee laga helo ilaha lagu kalsoonaan karo. Macluumaadka si degdeg ah ayuu isku beddeli karaa. La hadal dadka aad ku kalsoon yahay ee qaybta ka ah noloshaada, saaxiibadaada, iyo lammaanahaaga galmada.

Kahortag fonqorta/ceebeynta

Qof kasta ayuu ku dhici karaa furuqa daanyeerka (hMPXV). Ma jirto wax ceeb ah oo la xiriirta ogaanshaha inaad qabtid furuqa daanyeerka (hMPXV). Qaar badan oo naga mid ah ayaa ogaanaya inaan qabno maadaama aan qaadeyno tillaabooyin firfircoon si aan u ilaalino caafimaadkeena oo aan uga dhigno bulshadeena mid ammaan ah.

Fonqortu waxay naga hor joogsataa inaan helno daryeel caafimaad, la xiriirida lammaaneheena galmada, waxayna dhaawacdaa caafimaadkamaskaxdeena. Ma jirto wax ceeb ah oo la xiriiirta in la ogaado inaad qabtid furuqa daanyeerka (hMPXV).

Ogow sida furuqa daanyeerka (hMPXV) la isugu gudbiyo

furuqa daanyeerka (hMPXV) ma ahan caabuq ama cudur galmo lagu kala qaado. Furuqa daanyeerka (hMPXV) ayaa lagu kala qaadaa marka ay is-taabashada, gaarka ah, iyo maqaar-ka-maqaarka ah ee la yeesho firiiica qof qaba furuqa daanyeerka (hMPXV). Taabashada noocaan oo kale ah ayaa dhici karta inta lagu gudajiro hawlaha sida, shumiska, koolkoolinta, hab isa siinta, duugista, qoob-ka-cayaarka maqaar-aka-maqaarka ah, iyo galmada.

Ogow astaamaha

Ka hubi jidhkaaga. Astaamaha waxaa ka mid ah firiircyo cusub, nabarro, booggo, iyo dhibco. Dadka qaarkood ayaa sidoo kale ku dhaca qandho, madax-xanuun, qanjidho barar iyo xanuun leh, murqo xanuun, ama baro.

Haddii aadan dareento inay wax khaldan yihiin, aad qabtid firiiric ama astaan kale oo walaac leh, ka fogow taabashada, gaarka ah iyo maqaar-ka-maqaarka ah ee dadka kale, oo ula hadal bixiye daryeel caafimaad sida ugu dhakhsaha badan ee aad awooddo. Xusuusi iyaga in furuqa daanyeerka (hMPXV) uu soo gaaray halkan gudaha Oregon. Iyadoo dadka badankooda ay si badqab leh ugu raystaan guriga, daawayn ayaa diyaar u ah dad badan oo qaba ama halis ugu jira inay si daran ugu jirradaan cudurka. Bixiyaha daryeelka caafimaadkaaga ayaa kaa caawin kara inaad go'aan ka gaarto in daawadu kugu habboon tahay iyo in kale.

Waaxda caafimaadka ee deegaankaaga ayaa sidoo kale noqon karta isha waxtarka leh ee macluumaadka, baaritaanka, daaweynta, iyo tallaalka ee la idin kugu talagalay adiga iyo/ama lammaanahaaga.

Qorshe sii samayso

Haddii aad ka fikirayso inaad kaqaybgasho dabbaaldeg, riwaayad, xaflad ama dhacdo kale, si gaar ah ula soco muddada aad cid u dhawaanayso, si gaar ah, iyo taabashada
jir-ka-jir ee dhici karta. Tusaale ahaan, munaasabadaha ciyaaraha ama riwaayadaha ay u badan tahay inay si buuxda u labbisan yihiin oo aysan suurtogal ahayn inay is-taabasho maqaar-ka-maqaar ah yeeshaan ayaa ka ammaan badan marka loo eego naadiyada iyo xafladaha ay dadku xiran yihiin dhar aad u yar oo inta badan ay jirto is-taabasho maqaar-ka-maqaar ah ama goobaha bannaan sida biyo-kululaha, musqulaha qubeyska, ama naadiyada galmada halkaasoo dhar yar la qabo ama dhar la qabin iyo inta badan is-taabashada galmo.

Markaad ku fikirayso inaad samayso galmo, la xiriir lammaanahaaga. U sheeg sida aad dareemeyso, haddii aad dhowaanahan jirratay ama firiircyo ka soo baxeen, gaar ahaan xubnaha taranka ama dabada, una sheeg inay sidaas oo kale sameeyaan. Isticmaal muraayad yar ee gacanta ama telefoonkaaga si aad u eegto maqaarka ku hareeraysan futada iyo xubnaha taranka. Haddii adiga ama lammaanahaaga aad dhowaan jirrateen, hadda aad jiran tihiin, ama aad qabtaan firiiric cusub, iska ilaali is-taabashada, gaarka ah, iyo maqaar-ka-maqaarka ah oo la hadal bixiyaha daryeelka caafimaadka.

Si furan inaad ula xiriirto lammaanaha iyo inaad iska ilaaliso galmada marka aad jirran tahay ayaa ah habdhaqan wanaagsan guud ahaan.

Haddii aad doorato inaad galmo samayso, dooro hawlo aan ku lug lahayn is-taabashada tooska ah, maqaar-ka-maqaarka ah ama shumiska, dabool firiirica, dhaq gacmaha, shukumaanada, gogosha, alaabta galmada, iyo agabka kale isla markaaba, oo tixgeli inaad xaddiddo tirada lammaanayaasha. Tixgeli inaad samaysato koox yar oo aad la xiriirto. Dooro hal qof ama koox yar oo dad ah oo ku heshiiya inaad galmo sameynin haddii aad jirran tahay ama isku aragtaan wax firiiric cusub ah.

Xitaa haddii aad samayso kulamo galmo oo qarsoodahi, qorshee inaad hayso lambarka telefoo nka (ama nooc kale oo macluumaadka xiriirkaah) ee lammaanahaaga haddii aad u baahato inaad goor dambe la xiriirto. Qaabkaas ayaad ula xiriiri kartaa si aad u ogeysiiso inay

baari karaan furuqa daanyeerka (hMPXV) ama isku tallaali karaan haddii ay u-qalamaan.

Haddii aad ka walaacsan tahay inuu kugu dhacay furuqa daanyeerka (hMPXV), la xiriir hay'adda caafimaadka dadweynaha ee degaankaaga si aad ugala hadasho u-baylah noqoshada cudurka si go'aan looga gaaro tallaabada xigta ee ugu fiican.

Horay u sii wac

Haddii aad u malaynayso inaad qabto astaamo la xiriira furuqa daanyeerka (hMPXV), u sheeg bixiyaha daryeelka caafimaadkaaga kahor inta aadan booqan si laguu daryeelo. Haddii aad qorshaynayso inaad isticmaasho daryeelka degdeg ah ama qolka gurmadka degdega ah, u sheeg shaqaalaha hubinta imaanshaha inaad u malaayso inaad qabto furuqa daayeerka (hMPXV). Waxay kuu sheegi doonaan inaad xirato maaskaro waxayna kaa caawin doonaan inaad daboosho firiiric kasta oo maqaarka ku yaala oo bannaan marka aad sugayso daryeelka.

Ka warqab

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan furuqa daanyeerka (hMPXV) waxaa laga heli karaa mareegaha soo socda.

- CDC
- OHA
- Waaxda Caafimaadka ee Degmada Multnomah
- Mashruuca Cascade ee AYDHISKA iyo PRISM
- Caafimaadka Dadweynaha ee Degmada Lane
- Waaxda Caafimaadka Degmada Washington
- Waaxda caafimaadka ee Degmada Clackamas

Ka Jawaab-celinta cudurka dillacay

S: Sidee ayay OHA uga jawaab-celinaysaa cudurka dillaacay?

OHA waxay la shaqaynaysaa maamulada caafimaadka bulshada, qabaa'ilka, iyo danwadaagta bulsheed si ay u qoondeeyaan saadka tallaalka furuqa daanyeerka (hMPXV) ayna ula wadaagaan macluumaadka ku

saabsan furuqa daanyeerka (hMPXV), cudurka dillaacay, iyo xeeladaha kahortagga cudurka ee dadka laga yaabo inay halis dheeraad ah ugu jiraan cudurka.

OHA ayaa sidoo kale la wadaagayaan dhakhaatiirta macluumaad ku saabsan cudurka dillacay, sida loo garto oo loo baaro furuqa daanyeerka (hMPXV), iyo sida looga hortago faafitaanka.

Hawlaha dheeraadka ah:

- OHA ayaa siisay dadweynaha macluumaad ku saabsan astaamaha iyo waxyaabaha halista ah ee la xiriira furuqa daayeerka (hMPXV), iyo in la raadsda daryeel haddii ay kuwaani dhacaan.
- Shaybaarka Caafimaadka Dadweynaha ee Gobolka Oregon ayaa samaynaya baaritaanka bilowga ah wuxuuna qabanqaabinayaa baaritaanka lagu xaqiijinayo furuqa daanyeerka (hMPXV) iyada oo loo marayo CDC.
- OHA ayaa tallaal geynaysa degmooyinka iyo nidaamyo caafimaad si ay u caawiyaan dadka halista ugu jira cudurka si ay isku ilaaliyaan.

Helitaanka dukumiintiga: Shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale oo dadban sida fasiraadaha, daabicida farta waaweyn, ama farta indhoolayaasha. Kala xiriir COVID-19 Communications Unit lambarka 1-971-673-2411, 711 TTY ama COVID19.LanguageAccess@dhsoha.state.or.us.